



Warsidaha

Somaliland Biodiversity Foundation

Tirsigii 3aad, 15 May 2017

Helen Pickering

Tusmada

Dib-u-soo-Nooleynata	
Gacan Libaax..... 1	
Harimacadka oo laga baqo qabo in uu dabar go'o.... 2	
Kulan-howleed ku saabsan culuunta kala-duwanaansha Noolaha..... 3	
Geedka Xigga - il dakhli oo cusub..... 4	
Safar shaqo iyo Gacan Libaax..... 5	
Dhagax taariikhedka Laas Geel..... 6	
Cayayaanku Meel walba way joogaan (ugu yaraan)	7
Wararka Kale ee Hay'adda SBF..... 8	

Barasho Geed

Cadia purpurea ama [Salalmac]Buurta Gacan Libaax, ee ku taal buura-



Bogga 1aad

Dib-u-soo-Nooleynata Gacan Libaax

leyda Golis ee Somaliland, meesha uga dheer waxa ay gaadhaa hilaaddii 2000m. Sida magaca ka muuqdana, waxa ay ahaan jirtay goob Libaaxu ku badan yahay. Maamulkii Ingiriis ee Somaliland ayaa ka dhigay meel dhowran – si loo yareeyo tayo dhac ku yimaadda keymaleydeeda. Dawladihii isaga dambeeyayna howshii halkii ayaa ay ka sii wadeen, ilaa laga soo gaadhayo 1988kii oo dagaal ka qarxay dalka, hagadna ku sameeyay howlihi ka socday, dibna u giraangiriyay wax Alle wixii horumar ahaa ee laga sameeyay dhinacaas.



Dhisme xilligii Ingiriiska ah oo isugu jiray hoy iyo xarun cilmbaadhiseed.

Maanta Wasaaradda Deegaanga iyo Horumarinta Miyiga iyo hay'adda Candlelight ayaa iska kaashanaya joogtaynta qaayaha iyo quruxda deegaan ee buurta – iyaga oo dhisay moosas, iyo howlo kale oo dhowriseed, isla markaana tababarro u fidiyay bulshada wax ka taransata buurta. Howshaas oo soo socotay in muddo ahba ([Awale et al. 2005](#)). Hoy ay ku negaadaan ama ku nastaan dadka soo booqda ayaa ka jira. Guri ay Wasaaradda Deegaanku leedahayna dhismihiisii ayaa gebogebo ku dhow.



Hoy iyo Xafiis—Hay'adda Candlelight

Howlaha dakhli abuur ee ka socda deegaanka ku hareeraysan waxa ka mid ah xigga oo dumarku xadhko iyo alaabooyinka kale ka sameeyaan; iyo sidoo kale shinnidhaqasho. Se ma jiro qorshe libaaxii joogi jiray dib loogu soo celinayo. Ugu yaraan sidaasi bulshada

raynrayn bey u tahay!



Mid ka mida Mutulada loogu talo galay dalxiisayaasha

Roobabkii degaanka ka da'ay bilowgii bishii May ayaa abuuray muuqaal mar-la-arag ah. Marka buurta korkeeda dhinac Guban looga daymoodo. Buuraha Hegebo ee Lafaruug Waqooyi galbeed kaga qumman korkooda waxa ka muuqday biyo wadhan oo la moodo balliyo. Maxaa yeelay buuraha korkooda ayaa siman (eeg muuqaalka bogga korkiisa). Dhir badan oo ubxisay ayaa buurt Gacan Libaax korkeeda ka muuqday. Mid si gaar ah u mudan in loo sheegaa waaa Salamacda (*Cadia purpurea*), Likaha (*Hydnora johannis*), iyo jaad dacarta ka mid ah (*Aloe grisea*).



Roobab ka kaddib, in dhironku soo kabto waxa cubbodhowr ku ah daaqista joogtada ah, sidaas awgeedna, waxa mudnaanteeda leh in si la mid ah la joogteeyo wacyigelinta bulshada ku tiirsan kheyraadka buurta. Mar kan, Somaliland Biodiversity Foundation (SBF) waxa ay ku talo jirtaa sidii ay arrinkan gacan uga geysan lahayd.



Barasho Geed

Cadia purpurea ama [Salalmac]

Salamacdu waa mid ka mid ah dhirta ka baxda Buurta Gacan Libaax iyo meelo kale oo buuraleyda Golis ah. Waxa ay bixisaa ubaxyo soo jiidasho leh. Wuxuu geedkani noqon karaa mid guryaha iyo suuqyada lagu qurxiyo, weliba haddii loo hindiso qaab xulasho (*cultivar*) jaad sii haysan kara ubaxa.

Harimacadka oo laga baqo qabo in uu dabar go'o

Harimacadku (*Acinonyx jubatus*) waa xayawaanka ugu orod dheer ee arlada ku nool, oo gaadhi kara xawaare ku siman 110 km/s, ha yeeshiee, ayaan-darro, waxa uu muuqdaa in uu ku guuldarraysanayo tartankii nolosha. Qarnigii 19aad, tirada Ha-



rimacadka waxa lagu hilaadiiyay 100,000; maanta se wax aan ka badnayn 7,100 keliya ayaa nool. Harimacadku waxa uu u baahan yahay dhul aad u fidsan oo uu ka heli karo ugaadhsu ku filan, biyo, iyo gabbaad uu ku noolaan karo. Baabi'inta, kala-qoqobka hoy-degaannada (*habitat fragmentation*), iyo tayo dhaca deegaan, dhammaantood waxa ay yareeyaan mugga wax soosaar ee dhulka. Dhulal beryo hore kaabi jiray kumannaan harimacad ayaa aan maanta ku fillayn tiro yar oo ka mid ah. Intaas waxa dheer, Harimacadka inta badan waxa loo dilaa haraggiisa ama qaybo kale oo jidhkiisa ka mid ah. Halis kale waxa ay tahay Harimacadka dhasha ahi waxa uu leeyahay dabeecad deggan, markaasna si fudud ayaa looga xadi karaa hooyadood, si si aan sharciga waafaqsanayn loo iibyo, kaddiba laga dhigto xawayaan guri oo dabjoog ah (*pet*). Ayaan-darro, Somaliland waxa ay tahay il muhiim ah oo laga helo dhallaalka harimacadka. Daraasad ay samaysay hay'ad-da Cheetah Conservation Fund (CCF) waxa ay tilmaamaysaa in, mid kasta oo ka mid ah 12kii gu' ee inna soo dhaafay, hilaaddii 300 oo dhal harimacad gu'giiba laga sii koontarabaaniyay Somaliland, iyaga oo loo waday suuqyada Carabta ee Bari-ga Dhexe, halkas oo heysashada harimacadka looga aqoonsan yahay astaan hodon-tinnimo. Qaar badan oo ka mid ah ayaa dhexda ku sii dhinta. Tiro intaas le'eg, gu' kasta, oo laga xado dalalka laga helo harimacadka, sida Itoobiya iyo Waqooyiga Kiiniya oo markeeda horeba tiradoodu ahayd 300, ayaa halis ku ah sii waaritaanka harimacadka. Xog badan lagama hayo tirada ku nool Somaliland.

Ka-ganacsiga harimacada waxa 1975kii lagu xaaraantimeeyay heshiiskii Ka-ganacsiga Caalamiga ah ee Noolaha Dabar go' qarka u saaran [*Convention on International Trade of Endangered Species (CITES)*]. Iyada oo sidaasi jirto, haddana ka-ganacsigii xaaraanta ahaa halkiisi ayuu ka socdaa.



Dhallaal Harimacad la soo qafaashay.



Si dhibaatadan maare loogu helo, bishii Abril 2017, ayaa Wasuurka Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Miyugu, Marwo Shurki Xaaji Ismaaciil, u qabatay daneeyeyaasha arrimaha dhowrista Duurjoogta oo ka kala socday Wasaaradda, iyo Patricia Tricorache oo ka socota hay'ad caalami ah oo ka shaqaysa daryeelka Harimacadka oo magaceeda la yidhaahdo Cheetah Conservation Fund (CCF), (eeg muuqaala dhinaca bidix xiga. Waxa shirkaas lagaga hadlay sidii loo yarayn lahaa ka-ganacsiga sharci-darrada ah ee Harimacadka ee ka socda Somaliland.

Waxana ay ka qayb galeyaashii ku heshiiveen tabo lagu xaqiijin karo yoolkaas, oo ay ka mid tahay: Xoojinta wacyiga bulshada ee ku aaddan ganacsigan; kobcinta aqoonta howlwadeennada ka qayb qaata ka howl gala dadaalladan; xoojinta iskaashiga dalalka deriska ah sida Itoobiya iyo Jabbuuti, iyo daryeelka loo fidin karo kuwa la badbaadiyo. Waxa kale oo la isla soo qaaday iskaashi dhex mara Wasaaradda Deegaanka iyo dhinacyo kale, oo ay ka mid yihiin Colorado State University iyo Cheetah Conservation Fund, si sahan loogu sameeyo tirooyinka harimacadka ku sii nool carriga Somaliland, iyo sidii timaaddada kormeer loogu samayn lahaa.

Bogga 2aad

Somaliland waxa ka lumay 150 gu' ee u dambeeyay, duurjoogtii waaweynayd ee ay ka mid ahaayeen libaaxa, maroodiga, wiishii iyo qaar kale. Weyddiintuna waxa ay tahay, maxay innoogu fadhidaa in aynnu luminno mid kale oo ka mid ah duurjoogta sii hadhay? Warcelintu waxa ay noqon kartaa waxa aynnu waayaynaa qayb ka mid ah hadhaageennii hodanka ahaa, se in ay meesha ka baxaan duurjoogta waaweyn ee wax ugaadhsataa, waxa sabo-deegaaneedyada wada-oolkooda (ecosystems) ku dhiici kara kala-dhantaalni. Harimacadku, sida libaaxa oo kale, waa hilib-cune ku nool xayawaanka kale, oo ay ka mid yihiin qaar ka mid ah caleen-daaqeyaasha. Waxa kale oo lagu waayi karaa fursado dalxiis oo dhaqaale soo gelin lahaa dalka.

Kulan-howleed ku saabsan culuunta kala-duwanaansha Noolaha


22-24 May, hay'adda Somaliland Biodiversity Foundation (SBF) oo ay is-kaashanayaan Jaamacadda Hargeysa, waxa ay qabatay kulan-howleed 3 dharaarood ah oo ku saabsan culuunta kala-duwanaanshaha noolahay ee "Biodiversity Sciences Today" oo lagu qabtay Jaamacadda Hargeysa. Ka-soo-qaybgaleyaashu waxa ay isugu jireen arday Jaamacadda ka baxday iyo qaar ku jira sannadkii ugu dambeeyay oo dhiganayay culuunta deegaanka iyo beeraha, iyo cashar-jeediyeaal, iyo waliba shaqaale ka socday Wasaaradaha Beeraha iyo ta Deegaanka. Kulan-howleedka waxa daaddihinaysay Mary Barkworth, oo ka nasatay culuunta abla'ablaynta dhironka, xubinna ka ah Golaha Agasimeyaasha (*Board*) ee hay'adda SBF, isla markaana maamusha laba degel oo lagu ururiyo laguna wadaajiyoo xogaha la xidhiidha noolaha kala duwan (OpenHerbarium.org and OpenZooMu-seum.org); Garrett Billings, oo ka qalin jebiyay Jaamacadda Utah State University oo waayo'aragnimo badan u leh kala shegsheegidda dhirta dhinaca galbeed ee dalka Maraykanka; iyo Helen Pickering, oo si is-dirid ah uga howl gasha Royal Botanic Gardens, Kew, ee dalka Ingiriiska, isla markaana wax ka qortay dhowr buug oo ku saabsan dhironka Afrika iyo Cummaan.



Kulan-howleedka waxa furay Dr. Maxamed Yuusuf Muuse, Guddoomiyaha Jaamacadda Hargeysa, isaga oo soo dhoweyay ka-qaybgaleyaashii iyo daaddihiyeyaashii kulan-howleedka. Isaga oo ka hadlaya ahmiyadda kulan-howleedka, waxa uu ku nuuxnuuksaday baahida loo qabo culuunta kala-duwanaanshaha noolaha iyo kuwa la xidhiidha in loo adeegsado daryeelka kala-duwanaanshaheeda noole ee hodanka ah ee dhaqdhaqaqa aadanaha ee kala duwani culayska ku hayo. Sidoo kale, waxa uu ka-qayb-galeyaasha ku dhiirri geliyay in ay si dhammaystiran uga wada qayb qaataan doodaha si ay u xoojiyaan aqoonta ay ka heli doonaan kulanka.

Soo-ban-dhiggii ugu horreeyay ee qaybaha kulan-howleedka waxa lagaga hadlay qeexitaanno la xidhiidh culuunta kala duwanaanshaha noolaha. Waxa kale oo uu koobsaday qaababka loo wadaajin karo aqoontaas iyada oo la adeegsanayo is-gaadhsinta casriga ah. Ka-soo-qayb-galeyaasha waxa loo sharxay ereybixinnda loo adeegsado dhirta qaybahooda, si markaas ay ugu fududaato astaynta iyo garashadoodu ka hor intaan muunadahooda la diyaarin si loo diliwaan gelyo. Helen Pickering oo sawirqaadista ku baasnayd ayaa tustay kasoo-qayb-gelleyaashii waxyaabaha loo baahan yahay marka sawir la qaadayo si loo helo sawirro fiican oo muunadaha dhirta ah. Qorshihii hore waxa uu ahaa in qof kasta oo ka mid ah kasoo-qayb-galeyaashu uu xogta ku raro (*upload*) websiteka OpenHerbarium, si haleelkii ayaa aan suurto gelin.

Ugu dambayntii waxa kasoo-qayb-galeyaasha laga codsaday sii kulan hawleedyadan oo kale loo horumarin lahaa. Faallooyinkii ay bixiyeenna aad ayaa ay u muhiimsanaayeen. Waxana ka mid ahaa, qoraalladii la qaybiyay in hore loo sii qaybiyo ayaa ahayd ka hor qabashada kulan howleedka. Taas baana xoojin karta qaayaha kulan-howleedka. Sidoo kalena in ay sii diyaarsadaan koobid yar oo ku saabsan qof kasta waxa uu yahay (aqoon-ahaan, waayo-aragnimo iyo waxyaabaha ay daneeyaan, xogtaas oo tababareyaasha gacan ka siin doonta in ay wax ka ogaadaan kasoo-qaybgaleyaasha).



Geedka Xigga - il dakhli oo cusub

.Haweenka Soomaalidu dhaqan ahaan waxay ay badiba xadhiga loo yaqaan xigga ka samayn jireen oo ka tidci jireen laba geed oo xero-u-dhalad ah oo la kala yidhaa "Xaskul" [Sansevieria ehrenbergii] iyo "Xig" [S. forskaoliana (= S. abyssinica)].

Labaduba waa laba geed oo korniinkoodu gaabiyo oo aan badanka si cufan u bixin. Haddaba waxa jira jaad xigga ka mid ah oo magaciisa cilmiga ah la yidhaahdo *Agave sisalana* oo ka soo jeeda badhtamaha Ameerika, kaas oo maanta ah isha ugu muhiim-san ee miiqyada laga sameeyo xadhkaha iyo waxyaalo kale. Geedkan waxa Afrika keenay (siiba Taanganiika) Jarmalka sannadkii 1893-kii. 1906-dii, 887 Mitir tan oo maydhax xig ah ayaa sannadkiiba laga dhoofiyey Taanganiika oo Jarmalku guumaysan jiray (Anonymous 1908). Soomaalilaand meelo kala duwan ayaa geedkan lagu beeray 1950-kii, waxa se uu ugu badan yahay Go'da weyn oo u dhow buurta Gacan Libaax.

2016-kii hay'adda Candlelight, ee deegaanka iyo waxbarashada ka shaqaysa, oo kaalmo dhaqaale ka heleysa ururka caalamiga ah ee la yidhaahdo "International Solidarity Foundation of Finland" ayaa bilowday mashruuc la xidhiidha xoojiinta wax-soo-saarka xigga, habayntiisa iyo kor u qaadista tayadiisa, kaas oo laga hir geliyey Go'da weyn iyo Go'da yar, oo ah laba tuulo oo u dhaw buurta Gacan libaax. Shaqada mashruuca waxa kale oo ku jirtay bixinta mishiinnada fududeeya xigista, iyo sidoo kale mishiinnada wax tidcaya si loo helo tidicyo kala dhumuc duwan. Sidoo kale waxa jiray tababarro la xidhiidha wax soo saarka dacsadaha irridaha guryaha la dhigo, shandadaha iyo xadhkaha. Si loo xaqiijijo xaddi ku filan oo geedkan ah waxa la beeray kumannaan geed oo bulshada loo qaybiyeey.



Natiijada mashruuca ayaa noqotay in dumarka ka shaqaysan jiray xigga ee labada tuule ay helaan il dakhli oo cusub; Tirda dheeraadka ah ee beerista geedkani waxa ay hoos u dhigi kartaa baahidii markii hore ka haysay helitaanka maydhaxdiisa. Geedka Xigga waxa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu samaysto ood/deyr nool (*life fence*), tiirkiihana waxa loo isticmaalaa dhismaha. Maadaama geedkani raaifiyo muddada uu ubaxa sito oo ubaxu aanu hore uga dhicin, waxa uu muhiim u yahay malab soo saarka, in kasta oo dadka qaar ku sheegaan in malabkaasi uu noqdo mid laga dhadhan wanaagsan yahay. Wikipedia-ha ayaa sidoo kale taxay waxyaabo kale oo badan oo geedkan laga taransan karo, haddii loo baahdo.

Werwerka laga qabo geed kasta oo dibadda laga keeno waxa weeyee in uu isu rogi karo "weerare" (*invader*) ka buruud roonaan karo dhirta xero-u-dhaladka ah, dhibaatona soo gaadhsiin kara. Geedkan wuu tarmi og yahay laakiin sidoo kale xakamayntiisu way fududahay. Geedkani wuxu sidoo kale muhiim u yahay in uu hoos u dhigo jeexjeexyada dhulka. Hayeeshee waa in la maamulo fiditaankiisa si aanu dhib u noqon.

Waxa sidoo kale xiiso leh in la dhugto hadal uu yidhi Fitzpatrick (1910) oo ahaa "tijaabo cimri dheer ayaa caddaysay in geedkan labeeran karo. Sidaa darteed geedkan wuxu bixiyaa dakhli loo baahan yahay oo uu siyyaa dadka dhaqaalhoodu hooseeyo, wuxu sidoo kale ka caawiya dhirta xero-u-dhaladka ah in la madhxiyo oo aan aad loo isticmaalin, isla jeerkaasna wuxu yareeyaa jeexjeexyada dhulka ka qodma."



Beer Xig ku yaal. Kiiniya

Mutul lagu sameeyay qoryaha geedka Xigga, Buurta Gacan Libaax

Akhrisyo dheeraad ah:

Additional References Anonymous 1908. Cultivation of sisal hemp in German East Africa. Bulletin of Miscellaneous Information (Royal Botanic Gardens, Kew) 1908:300- 302.

Awale, A.I., M.E. Killeh, and A.A. Mohamed. 2005. Integrated community-based resource management in the grazing lands of Ga'an libah, Somaliland: case study. Report by Candlelight for Health, Education and Environment to the Food and Agricultural Organization.

Safar shaqo iyo Gacan Libaax

Bishii May 2017-kii, Somaliland Biodiversity Foundation iyo Jaamacadda Hargeysa waxay iska kaashadeen socdaal shaqo oo ay ku tageen buurta Gacan Libaax. Toddoba qof bay ka koobnaayeen oo kala ah: Cabdikariim C. Ismaaciil, Umulkhayr M. Diiriye iyo Cabdimajiid Cali Cilmi, oo ka tirsan ardayda ugu sarraysa barnaajimka barashada cilmiga deegaanka ee Jaamacadda Hargeysa; iyo Garrett Billings, Helen Pickering, Axmed Ibraahin Cawaale iyo Mary Barkworth oo ka socda Somaliland Biodiversity Foundation.



Maalintii koowaad iyo maalintii labaad, wawa diiradda la saaray sidii loo ururin lahaa dhir muunad ah, oo si fiican loo diiwaan geliyo, marka dambena la keeno Xarunta Kala-duwanaanshada Noolaha ee Jaamacadda Hargeysa. Muunadaha waxa diyaarinayey oo samaynayey ardayda, kaddib marka ay Helen iyo/ama Garrett sawir ka qaadaan. Muuqaallada ugu qurxoon waxa la dhigay oo laga heli karaa OpenHerbarium. Axmed, Helen iyo Biixi Gurey (Eeg warsidaha 2-aad



bogga 2-aad) waxay ku hawlanaayeen aqoonsiga dhirta, haddana qaar ka mid ah dhirta judhaba lama aqoonsan karayn. Dhibta ugu weyn ee meelo badan ka jirtay waxay ahayd in qaar ka mid ah dhirta la daaqay gebi ahaanba oo dhulka lala simay. Wawa la yareeyay xaddiga muunad-ahaan geed kasta looga qaadan karo si loo yareeyo dhaawaca geedka soo gaadhi kara (kol haddii ay saansaan adag ku jireen). Muunado dheeraad ah waxa loo diyaariiyey Helen si ay ugu qaaddo dhanka "Kew Botanic Gardens" oo leh shaqaale badan oo aqoon dheeraad ah u leh aqoonsiga dhirta Afrika, kuwaas oo la isku raacay in ay aqoonsan doonaan dhirtaas.

Maalintii 3-aad, Garrett Billings waxa uu u gudbiyay ka soo qayb galayaasha qaab loo qiimeeyo oo loo maamulo kala duwanaanta dhirta iyo inta ay kolba dhulka kaga fadhiyaan - qaabkaas oo ahaa, Intensive Modified Whittaker, (Barnett & Stohlgren 2003). Caqabadda kale waxay ahayd in la sameeyo liiska dhirta goobta, oo ay ku jiraan dhirta aan ubaxa lahayn. Halkaa marka la joogo, Axmed wuxu gacan weydiistay mid ka mid ah shaqaalaha goobta u jooga hay'adda Candlelight iyo Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta reer miyiga. Qiimaha aqoontoodu judhiiba way muuqatay oo waxay awoodeen in ay magacyo Soomaali ah ku sheegaan dhirta badankoodii.

Waxannu ku nasiib wanaagsanayn annaga oo uu buurta roob nagu helay. Waxana uu muujiyay faa'iidadii moosaska la dhigay si ay u yareeyaan qulqulka biyaha. Dhir badan baa ka baxday dhagxaanta gadaashhooda, iyo sidoo kale dhagxaanta dhexdooda, waxana yaraaday jeexjeexyadii hoos u qodnaa. Waxanu sidoo kale aragnay sida xad-dhaafka ah ee loo daaqay iyo xoolaha macalluulsan oo ah saamaynta sannadiihii badnaa ee abaarta ahaa ee ay Soomaalilaand beryahan la daristay. Hase ahaatee, dad badan oo da'yarta ah tan oo kale waxay la ahayd wax caadi ah, maxaa yeelay intii danbe waxay ku koreen saansan deegaan oo jaadkan oo kale ah.



Maalintii afaraadayaanu ka amba baxnay, iyada oo aannu ognahay in aanay fari ka qodnay shaqadii aannu u nimid buurta. Tirada dhirta ee aannu aqoonsannay ee ka baxda buurta Gacan libaax waxaannu ka kordhinnay 52, gaadhsiiinaynna 61 socdaalkan. Weliba tirada dhirtaasi waa si kordhi doontaa marka aannu aqoon-sanno kuwa aan weli la aqoonsan. Waxa macquul ah, haddii dhaqaale loo heli karro, in SBF iyo wasaaradda deegaanku ay ka wada shaqeeyaan sidii loo tababari lahaa shaqaalaha goobta si ay muunadda dhirta ugu sameeyaan iyaga oo adeegsanaya magacyo Soomaaliga ah, xogtana ku lifaaqaya oo ku qoraya Af Soomaali. Lifaaqaas ayaa hadhaw laga sii diyaarin karaa midda ingiriisida ah, sidoo kalena aqoonsi kaddib, lagu qori karaa magaca sayniska ah. Macluumaadka ingriisida ku lifaaqan waxa lala wadaagi karaa OpenHerbarium. Tani waxay caawin kartaa in la dhex gelin karo aqoonta gudaha ee dhirta Soomaalida ta qoraallada sayniska ah ee caalamiga ah, iyada oo la xaqiijinayo in magaca ku habboon ee sayniska ah lagu darayo mid gaar ah oo magac Soomaali ah. Helidda dhir muunad ah oo Gacan libaax leedahay oo ku lifaaqan Soomaali iyo Ingiriisi waxay caawinaysaa in aqoonta la gaadhsiiyo dadka iyo dugsiyada.


Liiska dhirta gacan libaax laga soo ururiyey illaa hadda waxa laga heli karaa adiga oo boocda (<http://openherbarium.org>) oo deeto ka sii doorta "Flora Projects", "Somaliland", "Plants of Gacan Libaax". Si aad u aragtid liiska iyo sawirradana, dooro "show as images" sanduuqa dhanka sare ee midig ee shaashada ay raacsan tahay "Rebuild list".



Dhagax taariikhheedka Laas Geel

Laas Geel waa goob lagu tilmaamay in ay ku yaalliiin dhagax-naqshadeedka ugu dhawrsanaan badan, kana mid ah kuwa ugu fac weyn leh ee ku yaal Afrika. Intii aanaan Soomaalilaand iman, annaga (Helen Pickering, Garrett Billings, Iyo Mary Barkworth) waxannu go'aansannay in aannu aad u jeelaan lahayn in aannu goobtaas aragno, deetana waxaannu goynay in Jimcaha taariikhdu ahayd May 11, ay tahay maalinta ugu habboon ee la tagi karo. Waxay noqotay in aannu Axmed Cawaale hore ugu sheegno. Wuxu nagula kulmay hudheelka, wuxuna naga caawiyeey in qalab aannu u sidnay geynno Xarunta Kaladuwanaanshaha Noolaha ee ku taal jaamacadda Hargeisa; ha yeeshi markii uu maqlay xiisahayga wuxu noo sharxay in aannu u baahannahay in aanu oggolaansho helno, iyo askar na wehelisa iyo weliba sidoo kale baabuur na qaadda. Wixaannu filaynay in ay adag tahay laakiin Axmed ayaa judhiiba hawl galay deetana maalintii xigtagayba waxaannu aragnay afartayadii oo gaadhigii saaran oo ku jihaysan xaggaa iyo Laas Geel. Booliskii ajnabiga loogu talo galayna waa na wehelinayay.

Farshaxanka dhagaxaasi waa mid la yaab leh. Midabbadu si yaab leh ayaa ay u bidhaamayaan sawirraduna aad bay u muuqdaan. Godadkaas iyo farshaxankoodaas waxa dareenka dunida ku soo jeediyeey oo hor keenay degel baadhe (arkiyoolajiis) Faransiis ah oo magaciisa la yidhaa Xavier Gutherz oo ka socday jaamacadda Paul Valery, ninkaas oo markii ugu horreysay daaha ka rogay godad taariikhheedkan 2002-dii, markii danbena ku soo noqday sannad ka dib si uu xog dheeraad ah u sii hubiyo. Dadka deegaanku way arki jireen oo ogaayeen sawirrada ha yeeshi waxay u haysteen in meesha ay deggen yihiin jiman iyo duul hoose sidaa darteed way ka dheeraan jireen. Taas baa caawisay in sawirradani aad uga dhawrsoonaadaan dhibaatooyinka aan ka ahayn inta ay cimiladu soo gaadhsiiso. Sawirrada badankoodu waa kuwo ka gaashaantay cimilada, dhagaxaanta dul sudhan awgeed iyo sidoo kale goobta oo ah goob aad u qallalan cimilo ahaan.



hoose ee Masarna waxa la mideeyey 5,000 oo sanno hortood.


Ma aha oo keliya farshaxanka dhagaxa waxa xiisaha lihi. Muuqaalka godka laftiisu waa mucjiso. Booqashadaydu keliya waxay ahayd iska dalxiis laakiin marka ay koox dhirya-qaan oo ahi u safraan meal aanay hore u arag, in ay hadba istaagaan oo dhir ururiyaan oo sawiraan waa lagama maarmaan.

Run ahaantii goob la tago way u qalantaa, laakiin xasuusnaw in aad qorshahaaga waqtii ka hor sii dejiso. Inta badan hudheelladu way diyaarin karaan oggolaanshaha muhiimka ah, darawalka, gaadiidka iyo ciidankaba, laakiin waxa lagu talinayaan in loo baahan yahay 48 saacadood ka hor in la sii ogaysiyo ama ka badan.

Xogta sare badankeeda waxa laga keenay muuqaal laga diyaariyeey Laas Geel iyo sidoo kale degellada-ka ay ka mid yihiin Cyark and Ancient Origins. Muuqaallada waxa qaaday Axmed Ibraahin Cawaale, Helen Pickering iyo Garrett Billings.

“Laas Geel” sida magacu sheegayo geela ayaa u soo aroori jiray. Sidoo kale labada ililadood ee qallalan ee ku kulma godka hortiisa waxay si xooggan u tilmaamayaan in goobtu iyo guud-ahaan cimiladu ay mar ka qoyaan badnayd sida ay haatan tahay. Waana ay ka sii qoyanayd xitaa markii sawirada la nashqadaynayey waayo badankoodu waa Lo’. Xayawaannada kale ee la sawiray ee ay ka midka yihiin shinbiraha, ugaadha qoobleyda ah, dameeraha iyo gerigu waxay tilmaan u yihiin in goobtu ay ka qoyaan badnayd badiba cimilada beryahan meesha lagu arkayey. Maanta goobta waxa loo deggen yahay si teel teel ah, xayawaanka ugu weyn ee lagu arkaana waa riyaha.

Intee ayey jiraan sawiradu? Qiyaaso ku dhisan da’da midabbada sawirku waxay sheegayaan 5500 illaa 4500 oo sanno da’ ah. Qiyaaso kalena waxay tilmaamayaan wax ka badan 11,000 oo sannadood. Marka la barbardhigo dooxada niilkha waxa la degay 9,000 oo sanno hortood, boqortooyoooyinka sare iyo



Dhagax taariikheedka Laas Geel


Haddii aad tidhaa "Cayayaan" qofka waxa ku soo dhacaya noocyoo kala duwan oo cayayaan ah. Qaar waxa judhaba ku soo dhacaya kaneeco, kuwo kalena qudhaanjo, kuwo kalena shin-ni; kuwa kale waxa laga yaabaa in ay ku soo dhacdo sida cayayaanku u dhawacaan dhirta, qaar kalena waxay ka fikiri karaan cayayaan ka qayb qaata faxalka, iyo cayayaan kale oo ah il cunto. Kala duwanaanta jawaabahaas ma aha wax lala yaabo maxaa yeelay saynisyahannadu waxay qiyaasaan in ay jiraan 9 Milyan oo nooc oo cayayaan ah, taas oo aad uga badan xaya-waannada kale. Cayayaanku waxay ku nool yihiin ku dhawaad meel kasta, iyaga oo aad u badan, waana qayb muhiim ah oo ka tirsan deegaanka. Labada meelood ee aanay ku badnayn waa badweynta, halkaas oo ay ilmaadeerradood "*crustaceans*" ay ku badan yihiin, iyo *Antarctica*-da oo leh keliya hal nooc oo cayayaan oo la yidhaa "*Belgica Antarctica*" oo dhererkoodu yahay 2-6 mm, kuwaas oo noqonaya cayayaanka ugu dheer ee ku nool dhulka qaarraddaas. Meelaha kale cayayaanku waa badan yahay waana kala duwan yahay.



Faxliddu waa qaybta loogu jecel yahay shaqada cayayaanka, maxaa yeelay, la'aantood lama heleen khudaarta sida Babaayga, Xabxabka, iyo Canbaha. Qaabka, Midabka, cabbirka iyo urta ubaxyadu waa waxa macquul ka dhigaya in cayayaanku wax faxli karo. Taasi waa mu-hiim waayo faxlidda ubaxyadu waxay u baahan yihiin in faxalka laga soo qaado geed kale oo isla noocan oo kale ah sidaa darteed faxlayaashu waa in ay awood u yeeshaan in ay aqoonsan karaan ubaxyada. Haddii cayayaanku garto in nooc gooni ah oo ubax ahi uu leeyahay ubax wacan oo dhabaqiisa la gaadhi karo, wuxu bilaabayaa in uu ugaadhsado nooca geedkaas la midka ah oo dhan. Cabbirka iyo qaabka ayaa sidoo kale tilmaama nooca cayayaanka ee geedkaas faxli kara: Ubaxyada yaryari waxay u baahan yihiin faxleyaal (cayayaan) yaryar.

Beeralaydu way isticmaali karaan aqoonta faxleyaasha si ay u kordhiyaan maxsuulkooda. Qaar faxleyaasha ka mid ahi, sida nooc ka mid ah shinni-malabta yurub, iyo kuwo kale waxay door bidaan god dhulka ah ama meelaha furan sida rasooyinka looxaanta dhexdooda. ma jiro faxle raba in uu u safro wax ka badan daruuriyaadkiisa cuntada iyo faxalka sidaa darteed haddii looga samayn lahaa guri meel u dhaw beerta, beeralaydu waxay qaabkaas ku korodhsan lahaayeen maxsuulkooda. Laakiin ugu horreyn waxay u baahan yihiin in ay ogadaan faxleyaasha ugu wanaagsan ee midhahooda.

Balanbaalista, xawxawlah (dragonflies), iyo xoonku waa cayayaan si qurxoon oo muuq leh u duula laakiin si weyn ugu kala duwan qaabka ay u dhix galaan nooleyasha kale. Balanbaalista qaangaadhka ahi waa faxleyaal booqda ubaxyada si ay dhabaq u helaan. Xawxawlulu qaangaadhka ahina waa kuwa si axmaqnimo ah u ugaadhsada cayayaanka kale, sida kaneecada, oo inta uu hawada ka qabto deeto cuna. Xoonka Qaangaadhka ahina wuxu cunaa kuwo badan oo ka tirsan kuwa aan lafdhabarta lahayn sida cayayaanka kale iyo caarada.



Diirta ballanbaalista ah iyo Xawxawlulu waxay cunaan dhirta. In badan oo ka mid ah diirta bal-anbaalistu waxay jecel yihiin in ay cunaan isla dhirta ay dadku jecel yihiin, sidaa darteed waxay ka mid noqonayaan dhabqiyeyasha beeraha laakiin diirta xawxawlulu wuxu cunaa dhirta biyaha ka baxda ee aan muhiimka u ahayn dadka. In badan oo ka mid ah dirindiirta xoonku waxay leeyihiin diir dulink ah. beedka waxa la dhigaa dhabar-ma-yeeshayaasha kale ama diirtooda, halkaas oo ay cunaan markii ay koraanba. Dhiirrigelinta xoonka diirtiisu si uu meesha uga saaro cayayaanka kale ee dulinka ah waa qaab habboon oo jaban oo lagu xakamayn karo dulinka dalaggaa.

Cayayaanka dhulka deggen waxay muhiim u yihiin caafimaadka carrada. Jidatka dhulka hoostiisa ay ka qodaan waxay oggo-laadaan biyaha iyo hawadu in ay ka gudbaan carrada. Labadaas oo muhiim u ah xididdada dhirta iyo fangasta ku nool dhulka hoostiisa iyo sidoo kale cayayaanka laftiisa. Cayayaanku sidoo kale waxay ka dhigaan carrada mid dihin iyaga oo waxyaabaha nool ee dhulka dul saaran geynaya dhulka hoostiisa iyo iyaga oo sidoo kale saxaradooda dhigaya jidatka ay samaysteen. Aboorka, oo si dhaw ula xidhiidha barambarta in ka badan qudhaanjada, waa cayayaan dhulka deggen in kasta oo badanka intiisa dhulka guud deggen ee duddumada samaysta oo qudha aad loo yaqaan. Waxay meelo badan sameeyaan qayb muuqata oo dhulka guudkiisa ah, sida Soomaalilaand, badankana waxay taasi tilmaan u tahay qoyaan ka jira dhulka hoose.

Aboorka oo dhami wuu cunaa looxa, waana ay dheefshiidaan iyaga oo caawimo ka heleya ilmo qabatayga ku nool dhuuntooda. Qaar ka mid ah aboorku wuxu ku nool yahay looxyada qallalay in ka badan dundumada. Waxayna aad u cunaan dhirta qallalan marka ay dhacaan laakiin ma cunaan marka looxaantu ay dhisme ku jiraan.



Xaar-walwaalku sidoo kale waa u muhiim caafimaadka carrada. Badankoodu waxay cunaan saxarada iyaga oo u jejebinaya lakabyo ay dhirta iyo fanguhu isticmaali karaan. qaar ka tirsan xaar walwaalku waxay saxarada u duuduubaan sidii kubbado yaryar waxana ay ku aasaan hoygoda; kuwa kalena waxay hoygoda ka dul dhistaan ama ka hoos dhistaan saxarada lafteeda. Dhibta ay qabaan kuwa saxarada walwaalaa waa iyaga oo aan dib u garan halkii hoygoodu ka xigay. Qaar baa ku socda ilayska cadceedda kuwa kalena xiddigaha. Xaar-walwaalladu waxay mashquul ku yihiin nooca saxarada ay cunaan, taas oo ku kelliftay Australia in ay isticmaasho xaar-walwaallo ajnabi ahi si ay uga takhalusaan saxarada adhiga, lo'da iyo fardaha. Waxay taasi ka mid ahayd tijaabooyinka lagu guuleystay ee lagu maamulay waxyaabaha nool iyada oo la isticmaalayo nooleyaa aan xero-u-dhalad ahayn.

Wararka Kale ee Hay'adda SBF

Dhowr waxqabad ayaa dhacay tan iyo soo saaristii war-sidihii hore. Mid ka mid ahi waa magacaabista **Warsame M. Axmed**, Madaxa Cilmi-baadhisti iyo Adeegyada Bulsho ee Jaamacadda Hargeysa, loo magacaabay in uu ka mid noqdo Guddida Sare (Board) ee Somaliland Biodiversity Foundation, isaga oo meteli doona Jaamacadda.

In uu Warsame xubin ka ahaado Guddida hay'adda waxa ay gacan ka gaysan doontaa wada shaqaynta Jaamacadda iyo SBF. Hay'addu sidoo kale waxa ay ka faa'iideysatay bookhashadii **Helen Pickering**, dirane (*volunteer*) ka socota Royal Botanic Gardens, Kew, oo adduunka meelo badan soo martay, iyadoo dhirta kala duwan u kuur gelaysay. Waxa ay wax ka qortay buugga, *Field Guide to the Wild Plants of Oman*, oo dhir badan oo ku jirta buuggaas ay ku aragtay Somaliland. Waxana u qors-haysan in ay diyaarisyo buug la mid ah oo dhirta Somaliland ku saabsan. Waxa kale oo ay Helen hay'adda SBF u fududaynaysaa ka faa'iideysiga aqoonyahannada dhir-aqoonka ah ee Kew Botanic Gardens, siiba marka ay joogto astaynta dhirta. Waxa kale oo ay naga caawisay in ay hay'adda ku xidho Sebsebe Demissew, madaxa Xarunta Qaran ee Dhirta lagu Keydiyo ee Itoobiya, oo muujiiyay xiise ah in uu la shaqeeyo Xarunta Kala-duwanaanshaha Noolaha ee Hargeysa. Waxa ay ku deeqday muuqallo ku soo baxay tir-sigan aynnu hadda gacanta ku heynno.

John Lavranos, oo dhiroonka biyoolaha ah (*succulents*) Afrika ka ururinaya 50kii gu' ee u dambeeyay ayaa Xarunta Kala-duwanaanshaha Noolaha ugu deeqay qaar badan oo ka mid ah qoraalladiisi cilmi-baadhiseed.



Wixii hadhaa ah ee uu innooga tagayo ee ku saabsan daahfurro dhinaca dhiroonka ah waxa ururiyay **Dylan P. Hannon**. IntaaS waxa dheer, **Andrea Cattabriga** oo Talyaani ah ayaa ku guda jira qoridda buug ku saabsan daahfurradii John ee dhiroonka, kuna salaysan qoraalladiisa duurka uu ku diyaariyay (*field notes*) iyo waraysiyo. **Paul Evangelista**, oo ah Borofeesar ka tirsan Colorado State University, ayaa la kulmay **Stephen Johnson**, **Garrett Billings**, and **Mary Barkworth** si ay uga wada hadlaan suurtogalmi mada iskaashiyo dhinaca kala-duwanaanshaha noolaha. Waxa kale oo uu la wadaagay degel (*website*) ay isaga iyo **Nick Young** sameeyeen si looga barto qaabka GIS-ka loogu adeegsado faaqidaadda kheyraadka dabiiciga ah, Itoobiya gudaheeda. Waana barnaamaj casharrada laga bartay lagu baahin karo meelo kale. **Stephen Johnson** waxa la guddoonsiyyay dhaqaalihii lagu fulin lahaa sahan ku saabsan geedka Mooliga (*Draceana ombet*, the Dragon's Blood Tree), Somaliland gudaheeda, siiba buurta Daalo.. **Garrett Billings** waxa uu gacan ka gaystay howlo duurka (*field work*) laga soo qabtay, kulan-howleed Hargeysa lagu qabtay oo ku saabsanaa kala-duwanaanshaha noolaha, iyo muuqallo uu war-sidahan u qaaday, isaga oo ay u ahayd socdaalkiisii ugu horreeyay ee Afrika. Garrett waxa uu dhowaan ka qalin jebiyay Utah State University.

Jaamacadda Hargeysa waxa ay soo dhejisay xayaysiis shaqo oo ku saabsan qof ka shaqeeya (*Museum Assistant*) Xarunta Kala-duwanaanshaha Noolaha ee Jaamacadda ku dhex taalla. Bishii June-ba waa uu howl galay qofkii ku guulaystay shaqadu oo Faisal Jaamac Geelle, xeeldheerina shahaadad kaga haysta Beeraha.

War-siduhu waxa uu isu beddeli doonaa mid sannadkii laba jeer la soo saaro, tirsiga kan xigaana waxa uu soo bixi doonaa Noofambar 2017. Waxa aannu u mahad celinaynaa dhamaan inta wax-ku-darsigoodu shaqada SBF ka dhigay mid suurto gasha.

Waxana la nagala soo xidhiidhi karaa: Web Site: <http://somalilandbiodiversity.org>

Email: mary.barkworth@gmail.com Mailing Address: Somaliland Biodiversity Foundation 397 Louralin Drive Logan, UT 84321